Sida loo akhriyo warbixinta ardayga

Natiijooyinka ardayga oo ku qoran qiyaasta qiimaynta oo ku saabsan qaybta qiimaynta ee kasta.

Natiijada min gees ilaa ka gees ee fasalada 3aad, 5aad, 7aad iyo 9aad ee qiimaynta akhris-qoraalka iyo xisaabta waxaa lagu soo bandhigay hal beeg u dhaxeeya qaybta 1aad ilaa qaybta 10aad. Hal beegga waxqabadka wuxuu u taagan yahay heerer xirfado iyo garashooyin sii kordhaaya laguna qeexay qiimaynta.

Tusaale, natiijooyinka fasalka **3aad** waxaa lagu soo bandhigay xad u dhaxeeya qaybta 1aad ilaa qaybta 6aad



Haddii natiijada ardaygu halkaan ahaato, taas macnaheedu waxay tahay in natiijadu ay aad uga sareyso heerkii la filaayey ee waxqabadka ardayda fasalka 3aad.

Dhibcuhu waxay muujinayaa natiijada arday kasta.

Saddex xagalka madow waxuu muujiyaa celceliska qarameed ee ardayda fasalka 3aad.

Saddex xagalka madow waxuu muujiyaa celceliska qarameed ee ardayda fasalka 3aad.

Ardayda fasalka 3aad ee hesha natiijada Qaybta 1aad waxay ka hooseeyaan heerar qarameedka ugu hooseeya.

Macluumaad dheeraad ah

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo ka-wada-hadal oo ku saabsan natiijooyinka ilmahaaga fadlan la xiriir macalinka ilmahaaga ama maamulaha dugsiga.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan natiijooyinka iyo warbixinnada NAPLAN ka eeg website-ka Barnaamijka Qiimaynta Qaranka www.nap.edu.au.

acara AUSTRALIAN CURRICULUM ASSESSMENT AND REPORTING AUTHORITY
www.acara.edu.au

NAP NATIONAL ASSESSMENT PROGRAM
www.nap.edu.au

NAPLAN 2011

BARNAAMIJKA QIIMAYNTA QARANKA

Aqris-Qoraalka iyo Xisaabta

Macluumaadka Warbixinta Ardayga ee loogu talagalay Waalidiinta

Somali

State Government Victoria

VICTORIAN CURRICULUM AND ASSESSMENT AUTHORITY

Barnaamijka Qiimaynta Qarameed – Imtixaanada akhris-qoraalka iyo xisaabta (NAPLAN)

Bishii Maajo ee sannadkan, imtixaanadii aqris-qoraalka iyo xisaabta waxaa laga qaaday ardayda Sannooyinka 3aad, 5aad, 7aad iyo 9aad ee Australia oo dhan. In ka badan hal malyan oo arday oo ka kala socda 10,000 dugsi oo Australia oo dhan ah ayaa ka qaybgalay imtixaannadaas qaran. Warbixinta NAPLAN ee ilmahaaga waxay muujinaysaa sida uu ilmahaagu wax u baranayo:

- marka la barbar-dhigo ardayda Australia
- Marka loo eego Heerka Ugu-Hooseysa ee Qaranka.

Waxaa kaloo suurtagal ah inaad hesho dareenka waxqabadka ilmahaaga ee sannadaha adoo u eega warbixinadii NAPLAN ee sannadihii hore, si kastaba ha ahaatee taxadar waa in loo yeeshaa in natiijooyinku yihiin waqti gaar ah oo keliya waxaana laga yaabaa inaysan muujinayn kartida ilmahaaga oo dhan. Sannadkii 2011 qiyaas qoraal cusub ah ayaa la sameeyey oo loogu talagalay qoraalka qanciska ah (persuasive writing), kaas oo aan la barbardhigi karin qiyaasta qoraalka ee warinta ah (narrative writing).

Maxaa lagu qiimeeyaa imtixaanka NAPLAN?

Imtixaannada aqris-qoraalku waxay cabbiraan waxqabadka ardayga ee xagga aqriska, qoraalka iyo qiyamka luqadda (hikaadda, naxwaha iyo shaqalka). Imtixaannada xisaabtuna waxay cabbiraan waxqabadka ardayga ee tirada, aljabrada, fanshanka iyo hannaanka, cabbiraada, fursadda iyo dhaatada iyo booska.

Ujeeddada imtixaanka NAPLAN

Natiijooyinka NAPLAN ee heerarka dugsiga, nadaamka, iyo qaranka waxaa loo adeegsadaa inay muujiyaan xoogagga iyo liidashada barnaamijyada waxbarashada iyo inay gacan ka gaystaan samaynta hadafyada ee wax hagaajinta. Xagga fasalka dhexdiisa, natiijooyinka NAPLAN waxay macalimiinta tusayaan sida waxqabadka ardaydooda loo barbardhigo kooxaha ballaaran ee ardayda Australia oo dhan ah. Warbixinnada shaqsi ee ardayda waxaa loo adeegsan karaa inay wada-hadal ka dhex-abuuraan waalidiinta iyo macalimiinta oo ku saabsan waxqabadka iyo horumarka ilmahaaga.

Waa muhiim in la xusuusnaado in natiijooyinku ay muujiyaan dedaalka arday walba waqti uun ka mid ah waqtiyada. Macalimiinta dugsiyada oo dhan waxay si joogto ah u qiimeeyaan wax-barashada ardaydooda ee xagga aqris-qoraalka iyo xisaabta. Imtixaanka NAPLAN way kaabaysaa hase ahaatee baddal uma noqonayso macluumaadkii ay macalimiintu ururiyeen.

Warbixinta Dugsiga

Natiijooyinka dugsiga ee celceliska ah ee imtixaannada NAPLAN waxaa lagu soo gudbiyaa si qaran oo hab isbarbardhig ah website-ka My School (www.myschool.edu.au). Website-kan wuxuu waalidiinta iyo xubnaha bulshada siinayaa macluumaad si ay u sameeyaan doorashooyinka iyo wada-hadalka si kor loogu qaado hagaajinta dugsiga.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Websiteka My School, fadlan kala xiriir ACARA taleefanka 1300 895 563 ama email u dir info@myschool.edu.au

Warbixinaha Ardayga ee Gaarka ah

Qaabka ay leeyihiin warbixinnada ardayda ee NAPLAN waa mid isku wada mid ah dowlad-goboleedyada iyo taritooriyada Australia oo dhan waxaana loo sameeyey si qaran oo looga warbixiyo waxqabadka ardayda waalidiinta iyo daryeelayaasha.

Warbixin kasta waxaa ku jira:

- Faahfaahinta ardayga iyo dugsiga
- Macluumaadka ku saabsan imtixaannada NAPLAN
- macluumaadka sida loo aqriyo warbixinta ardayga
- natiijooyinka waxqabadka ardayga ee shaqsiga ah xagga aqriska, qoraalka qanciska ah, qiyamka luqadda, iyo xisaabta oo ku muujisan Qiyaasta Qiimaynta ee NAPLAN.
- Tuse loogu talagalay qaybata qiimayn kasta kaasoo muujiya celceliska qaraneed iyo 60% dhexe ee natiijooyinka qaraneed
- Warbixin qoran oo loogu talo galay qaybta qiimay kasta caddaynaysana nooca xirfadaha la qiimayey
- Shaxda sheegaysa xirfadaha laga yaabo inay ardaydu ka gaareen qayb kasta.

Aqrinta Warbixinta Ardayga ee Gaarka ah

Natiijada ilmahaaga waxaa u taagan dhibcaha madow ee garaaf kasta. Xirfadaha la xiriira qaybta ay dhicdu ku dhacdo waxaa lagu qeexay baalka dambe ee warbixinta. Ardayga lagu qiimeeyey qaybta gaarka ah waxay u dhowdahay inuu ka jawaabay su'aalaha la xiriira xirfadaha ku jira qaybta iyo qayb kasta oo taas ka hoosaysa. Natiijooyinka ilmahaaga waxaa la barbar dhigi karaa natiijooyinka 60%ka dhexe ee ardayda Australia iyo/ama kuwa celcelis qaraneedka ee heer sannadeedkeeda/kiisa.

Qiyaasaha Qiimaynta iyo Heerarka Ugu-hooseeya ee Qaraneed

Mid kasta oo Qiyaasaha Qiimaynta ee NAPLAN waxay sheegaysaa waxqabadka ardayga laga soo bilaabo Sannadka 3aad ilaa iyo Sannadka 9aad ayadoo la raacayo qiyaasta guud, taas oo loo qaybiyo toban qaybood. Qaybuhu waxay muujinayaan adkaanta kordhaysa ee xirfadaha lagu qiimeeyey NAPLAN. Lix ka mid ah qaybaha waxaa loo adeegsadaa in looga warbixiyo waxqabadka ardayga ee heer sannadeed kasta.

Heerarka Ugu-Hooseeya ee Qaran waxaa ku jira hal qayb ee heer sannadeed kasta waxay sheegaysaa xirfadaha iyo garashooyinka qaarkood oo ay ardaydu guud ahaan ka muujin karaan sannad dugsiyeedkooda gaar ahaaneed. Waxay u taagan yihiin xirfadaha loolanka sii kordhaya leh iyo garashooyinka markay ardaydu ka gudbayaan Sannadka 3aad ilaa iyo Sannadka 9aad. Haddii natiijada ilmahaagu ay qaybtan ku jirto ama ka hooseyso, markaas waxaa lagu talinayaa inaad kala hadasho natiijadaas dugsiga ilmahaaga.

- Ardayda fasalka 3aad heerarka ugu hooseeya ee laga rabo waa qaybta 2aad
- Ardayda fasalka 5aad heerarka ugu hooseeya ee laga rabo waa qaybta 4aad
- Ardayda fasalka 7aad heerarka ugu hooseeya ee laga rabo waa qaybta 5aad
- Ardayda fasalka 9aad heerarka ugu hooseeya ee laga rabo waa qaybta 6aad.

Garaafka Miisaanka Qiimaynta ee NAPLAN

Fasalka 3aad Akhriska



Dhibicda maddow waxay muujisaa in sannadkaan ardayga fasalka 3aad uu hantay natiijo ku jirta qaybta 4aad ee akhriska oo wax yar ka sareysa celceliska qaraneed. Saddex xagalka madow wuxuu muujiyaa celceliska qaraneed ee ardayda fasalka 3aad. Qaybta buluugga khafiifka ah waxay muujisaa xadka waxqabadka ee 60% dhexe ee ardayda fasalka 3.

Sannadka 5aad Qoraalka (qancinta ah)



Dhibicda Madow waxay muujhinaysaa in ardaygan Fasalka 5aad inuu gaarey natiijo ka hoosaysa heerka ugu hoosaysa ee qaraneed ee Qoraalka (Qancinta ah). Waxaa lagu taliyey in natiijooyinka la mid ah kuwaan lagala hadlo dugsiga.

Fasalka 7aad Xisaabta



Dhibicda madow waxay muujisaa in ardayga fasalka 7aad uu hantay natiijo ku jirta qaybta 9aad ee xisaabta, aadna uga sarreysa aqlabiyadda natiijooyinka xisaabta iyo celceliska qaraneed ee ardayda fasalka 7aad.